



Codso daryeel caafimaad:

- adigoo galaya barta internetka [Benefits.Ohio.Gov](https://www.benefits.ohio.gov),
- taleefan udir (800) 324-8680, ama
- si shaqsi ah ugutag Waaxda Degmadaada ee Adeegyada Shaqada iyo Qoyska.

Ka firi xafiiska deegaanka adoo galaaya bogga [JFS.Ohio.Gov/County](https://www.jfs.ohio.gov/county).

Wac Laynka Macaamiisha ee Tooska ah ee Medicaid oo ah (800) 324-8680 si lagaaga caawiyo buuxinta codsiga ama su'aalaha kale ee aad qabto.

Macluumaad dheeri ah waxaad kahelaysaa bogga [Medicaid.Ohio.Gov](https://www.medicaid.ohio.gov).

Ohio

Department of
Medicaid

Kusumowga birta (Lead Poisoning) iyo Kahortaggeeda

Ohio Medicaid waxay kaashataa Waaxda Ohio uqaabilsan Caafimaadka iyo kuwo kale si loo kordhiyo cadadka baaritaannada laxariira kusumowga birta ee dhiigga gasha lana sugo caafimaadka caruurta.

Kusumowga birtu waxuu dhacaa marka birta (lead) ay kumilanto jirka ayadoo kasoo galaysa neefsiga ama liqida waxay gashay. Kusumowga birtu waxuu keeni karaa naafonimo dhanka waxbarashada ah, kobac liita, maqalka oo dhuma, iyo hoos u dhac dhanka korniinka ah.

Astaamaha lagu garto kusumowga birtu ma aha kuwo markasta iskumid ah. Baaritaanka kusumowga birta ee dhiiga waa sida kaliya ee lagu go'aamin karo in cunugu sumaysan yahay. Si gacan lagaaga siiyo kahortagga kusumowga birta hay'adda Ohio Medicaid ayaa bixinaysa qarashaadka baaritaanka kusumowga birta dhiigga ee caruurta barnaamijka kadiiwaangashan.

Meelaha kusumowga birtu ka iman karto waxaa kamid ah:

- hawada wasaqaysan
- riinjiga birtu ku jirto (lead-based)
- boorka
- biyaha
- ciida
- biraha qalinka
- boombalayaasha caruurta

Wixii macluumaad dheeri ah oo kusaabsan kusumowga birta (lead poisoning) iyo kahortaggeeda:

- booqo barta internetka [ODH.Ohio.Gov](https://www.odh.ohio.gov), ama
- wac Waaxda Ohio uqaabilsan Caafimaadka (877) 532-3723.